

# Kala duwanaanshaha u Dhaxeeyo Family Care, Partnership, iyo PACE

(Differences Between Family Care, Partnership, and PACE)



Dokumentigaan wuxuu sharaxaa qaar ka mid ah kala duwanaanshaha u dhaxeeyo barnaamijyadaan daryeelka muddada dheeree la maareeyay:

- Family Care
- Partnership
- PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Daryeelka Dhammaan Loo dhanyahay ee Waayeelka)

Waad iska diiwaangelin kartaa hal barnaamijka daryeelka muddada dheer ee la maareeyay waqtigiiba. Dhammaan barnaamijyada waa iqtiyaar. Iqtiyaar waxaa loola jeedaa dooqaaga aad iskaga diiwaangeliso. Waad dooran kartaa inaad u badesho barnaamij ka duwan, ururka daryeelka la maareeyay, ama ka tagtid barnaamijka xili walba.

**Ogow:** Partnership iyo PACE laguma bixiyo gobolada Wisconsin oo dhan. Weydii ADRC deegaankaaga (aging and disability resource center) (xarunta illaha gabowga iyo naafonimada) ama Tribal ADRS (aging and disability resource specialist) (taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada) wax ku saabsan dooqyada kuu dhow.

## Adeegyada

Family Care waxay bixisaa adeegyada daryeelka muddada dheer oo kala duwan oo dadka waayeelka iyo dadka weyn ee naafada ah. Partnership iyo PACE waxay bixisaa isla adeegyada daryeelka muddada dheer ee ay bixiso Family Care. Partnership iyo PACE ayaa sidoo kale bixiyo caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka iyo daawooyinka qoraalka.

Waad go'aansan kartaa inaad doorato barnaamij ku saleysan adeegyada aad u baahantahay.

### Weydii naftaada:

- Miyaan rabaa koox dad ah oo xiriirinayo caafimaadkeyga iyo adeegyada caafimaadka?
- Miyaan leeyahay wax ka badan hal baaris ama xaalad adag?
- Ma inaan qaataa daawo badan?
- Ma inaan aadaa isbitaalka marar badan?

Haddii aad ku jawaabtid “haa” oo kuwa walba oo su'aalahaan ah, Partnership ama PACE ayaa laga yaabaa inay kuu noqdaan dooq fiican.



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES



## Erayada la garto



**Daryeelka muddada dheer**— Kan waa adeeg ama taageerada laga yaabo inaad u baahato sababtoo ah hal ama ka badan ee kuwa xiggo:

- Waxaad qabtaa naafonimo.
- Aad tahay 65 sanno jir ama ka weyn (55 ama ka weyn oo PACE).
- Aad leedahay xaalad joogta ah oo waarta.
- Aad caawin uga baahantahay howlo maalmeedka, sida labisashada ama qubeyska.



**Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka**— Kuwaan waa adeegyada dhaqtarka, kalkaalisada, ama bixiyaha kale ee caafimaadka u qalma, oo ay ku jiraan:

- Ka hortaga cudurka.
- Dayactirka caafimaadka.
- Waxbarashada bukaanka.



**Daawooyinka qoraalka**— Kuwaan waxaa ku jiro dhammaan adeegyada daawada Medicaid iyo Medicare. Xubnaha Partnership iyo PACE uma baahnid qorshaha daawada gooniga ah ee Medicare Qeybta D.



# Kooxda daryeelka

Barnaamij walba wuxuu leeyahay kooxda daryeelka. Xubnaha kooxda daryeelka waxay ku kala duwanyihiin barnaamijka.

## Weydii naftaada:

Ma muhiim ayay ii tahay qofka ku jiro kooxda daryeelkeyga?

### Family Care

- DacwoodahaW
- Maareeyaha daryeelka
- Kaaliso diiwaangashan
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar*)
- Xirfadlayaal kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*)

### Partnership

- Dacwoodaha
- Kaaliso dhaqtar
- Maareeyaha daryeelka
- Kaaliso diiwaangashan
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar*)
- Xirfadlayaal kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*)

### PACE

- Dacwoodaha
- Dhaqtarka PACE (ama dhaqtarka bulshada)
- Kaaliso diiwaangashan
- Maareeyaha daryeelka
- Iskuduwaha xarunta PACE
- Xiriiriyaha daryeelka guriga
- Daaweeyaha jireed, shaqada, iyo madadaalada
- Taqasuska cuntada
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar ah*)
- Xirfadlayaal kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*)

**Ogow:** Haddii qof uu ku sameeyo dooqyada sharciga ah matalaadaada, sida masuul, waxay sidoo kale ka qeyb noqonayaan kooxda daryeelkaaga.

